

SHARCI lambar 49, 26 Agoosto 1972
Wax ka bedellid Xeer Sharcidejin 7-12-1966, lambar 6.

MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU DHAGEYSTAY Golaha Xoghayayaasha;
ISAGA OO TIXGELINAAYA aqbalaada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Canshuurta moorka, qaybta nooca culaabtiranka ah ee lagu jideeyey qodobka 7 ee Xeer Sharcidejin 07/12/1966, lambar 6, waxaa la kordhiyey Sh.So. 1%.

Qod. 2

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta ku xigta maalinta lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah. Sharcigaan waxaa la dhexgelin doonaa Uruurinta Rasmiga ah ee Sharciyada iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya. Wuxuu khasab ku yahay qof kasta oo ay waajib ku tahay in uu u hoggaansamo ama ka shaqeeya in loogu hoggaansamo si sharci Qaran ahaana.

Muqdisho, 26 Agoosto 1972.

MADAXWEYNAHA
Golaha Sare ee Kacaanka
S. Gaas Mohamed Siad Barre